

# Hadda

Cimiladu ma sugi karto.

## Waa hadda xilliga aynu dariiq dooranaynaa

Waa hadda markuu barafka Arktis-ka yaalaa uu dhalaalaayay. Waa hadda marka ay dagaal iyo iskahorimaadyadu ay ka sii kordhayaan waddada abaarta. Isbedelada cimiladu ma aha su'aal mustaqbal taala. Hadda ayuu dhacayaa.

Inta uu Xisbiga cagaarku ku jirey dawlada ayaa, miisaaniyadda deegaanka ee Iswiidhan ayay wax labanlaab ka badan noqotey. Xisbiyada kale waxay doonayaan in ay wali joojiyaan oo ay yareeyaan siyaasadda lagama maarmaanka ah ee cimilada. Marka go'aamada la gaaraayo – ayaa markaa waxa kaliya ee jiraa uu yahay hal xisbi oo cagaar ah.

Xalalku waa ay jiraan: 100% tamar dib loo cusbooneysiin karo, tareeno dhakhso badan, cunto dabiici ah, meelaha miyiga oo nool iyo magaalooyin carruurta u wanaagsan. Bulsho aynaan caalamka iyo nafteena toona gubin.

Doorashada 2018 waxay ku saabsan tahay

inaynu carruurteena iyo caruurta aynu awowga u nahay aynu eegi karro oo aynu ku odhan karno waanu sameynay wixii aynu qaban kareynay.

Cimiladu ma sugi karto.

Dad badan ayaa wax aad u badan samaynaaya. Deegaanka, iyo midba midkooda kale. Laakiin haddii Iswiidhan ay noqoneyso dalkii ugu horreeyay ee wadamada horumaray aan isticmaalin shidaalka ayay waxay sidoo kale ku saabsantahay inaynu wax wada qabano.

Aad mp.se oo ka akhri wax dheeraad ah oo ku saabsan waxa aan rabno iyo waxa kala duwan ee codkaaga sameyn karo.

**U codee Xisbiga cagaarka  
doorashda 9 Sebtembar!**



# Xisbiga cagaarku waxa uu rabbaa

**Inuu awooda saaro tareenada xawaarahoodu sareeyo, uu balaariyo oo uu dib u hagaajiyo xadiidka tareenka ee waddanka oo idil.**

Waa inay sahlanaato inaad si fudud oo cimilada u roon ugu safartid tareen wakhti/jadwal ku socda oo la isku xidho nidaamka tigidhada. Waxaanu dooneynaa in aan bilowno tareenka habeenkii aadaaya wadamada kale ee qaarada , oo la balaariyo waddooyinka baaskiilka, gaadiidka dadweynaha iyo shidaal la dib loo cusbooneysiyo ee dhamaan Iswiidhan oo dhan.

**Kor loo qaado cuntooyinka cimilada u roon ee dabiiciga ah.**

Dugsiyada iyo guryaha dadka hawlgabka ah waa in la siiyaa cunto dabiici ah oo meel ku dhow laga soo saaray. Waxaanu dooneynaa inaanu canshuur saarno hilibka laga soo dhoofiyo dibedda kuwaas oo antibiyootiko aan loo baahneyn loo isticmaaley daryeelka xayawaanka.

**Joojino faafidda balaastigga iyo sunta ee badda iyo biyaha galeysa.**

Waxaanu dooneynaa inaan ilaalino aagag badan oo badda ah, mamcuunco waxyaabaha aan loo baahnayn ee balaastigga ka sameysan iyo in canshuur la saaro waxyaalaha halka mar la isticmaalo. Shirkadaha waa in ay soo sheegaan wakhtiga ay alaabtu jireyso oo waa

**Xisbiga cagaarka. Miyaad dooneysa inaad deeq na siiyo, swisha ku soo dir 123 453 50 50. Xubin ka noqo [www.mp.se/bli-medlem](http://www.mp.se/bli-medlem)**

in anay ka dhib yaraato in wax la dayac tiro/la haaajin karro.

**Cid kasta la siiyo awood dheeraad ah oo ay ku maamulaan waqtigooda iyo waqtigooda shaqada.**

Waxaanu dooneynaa inaan hoos udhigno saacadaha shaqada oo aanu awooda saarno mushaharka isku midka ah iyo lacagta hawlgabka. Shaqooyin cusub oo cagaaran ayaa soo kordhaaya marka aynu maalgashano tiknoolijiyadda deegaanka u fiican iyo in wax la barto noloshu qofka oo dhan.

**In dhalinyarada xanuunsaneysa ay taageero helaan waqti ku haboon.**

Waxaanu rabnaa inaan xoojino caafimaadka ardayga oo aan si tartiib tartiib ah u suurogalino caafimaadka maskaxda ee caruurta iyo dhalinyarada oo aan la sugaynin/kiyuu laheyn. Ardaydu waa inay waqti badan la qaataan macallimiintooda iyadoo macallimiinta hawshooda laga dhimaayo. Dammaanadda wax akhrinta-qorista-xisaabtinta waa in la laga dhabeeyo.

**In Sweden ay u taagan tahay nabadda, sinnaanta jinsiga iyo siyaasadda qaxootiga oo ka bini-aadansan.**

Iswiidhan hub uma dhoofin doonto kaligood-taliyayaasha, waxaananau maya ku odhan doonaa xubinimada NATO. Waxaanu doonaynaa inaanu ilaalino xuquuqda magangelyadoonka oo aanu dadka soo cararey siinno xaqa ay u leeyihiin in ay dib ula midoobaan qoysaskooda. Waxay taasi ku saabsan tahay bini aadannimadda.